

Kaalay aan u dabbaaldeegnee Xafladda Dhagax-dhigga dhismaha cusub ee Multiple Pathways to Graduation (Dhabbooyinka Badan ee Qalinjabinta) ee Sabtida, Sibtambar 10th, 11 a.m.

Ardayda, Qoysaska iyo Bulshada Sharafta leh ee Multiple Pathways to Graduation,

Waxaanu rabnaa inaanu kugu martiqaadno Xafladda Dhagax-dhigga gaarka ah ee lagu bilaabay dhismaha Multiple Pathways to Graduation (MPG) Sabtida, Sibtambar 10keeda, 11:00 a.m. Dabbaaldeeggu wuxuu ka dhici doonaa goobta dhismaha cusub ee MPG laga dhisi doono oo ah 1530 NE Glisan Street.

[Halkan guji si aad u aragtid xaashida munaasabadda Dhagax-dhigga Multiple Pathways to Graduation.](#)

[Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [中文](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#)

Dhisme cusub oo casri ah

Iyadoo ka qayb ah barnaamijka Curaarta PPS, dhismaha cusub ee Multiple Pathways to Graduation (MPG) waxa laga dhisi doonaa kambaska Benson Polytechnic laga bilaabo xagaaga 2022. Dhismaha cusub oo ku fadhiya 85,000 fuudh laba jibbaaran oo dabaqyo badan ka kooban wuxuu ku oolli doonaa baarkiinkii hore ee Benson ee ku yaalay cirifka jidka NE Glisan iyo Jidka Wayn ee 16aad. Barnaamijyada Multiple Pathways to Graduation (MPG) waxa ka mid noqon doona Alliance at Benson and Meek, DART/Clinton, Teen Parent Childcare, Teen Parent Services iyo Reconnection Services and Center.

[Halkan guji si aad u aragto xaashida xaqiiqda mashruuca MPG.](#) [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#) | [中文](#)

Dhismaha cusub ee MPG waxa ka mid noqon doonaa goob jidh-dhis oo 500 oo kursi yaalaan iyo goob Halabuur, wuxuuna martgalin doonaa barnaamijyada CTE sida Baabuurta, Warshadaynta, Cunto-karinta, iyo Warbaahinta Dhijitaalka. Dhismahan LEED Gold ee la soo jeediyey waxa ka mid noqon doonaa mabaadii'da nashqadda maan-ku-haynta jugta, oo ah mid ka mid ah qaababka nashqadaha ee dhawrka ah ee loo abuurto deegaan si buuxda u taageeraya baahiyaha kala duwan iyo kuwa gaarka ah ee barnaamijyada iyo ardayda MPG.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dhismaha cusub ee Multiple Pathways to Graduation, booqo websaytka mashruuca: <https://www.pps.net/Page/14873>.

Dhismaha cusub wuxuu furmi doonaa 2024

Dhismuhu wuxuu socon doonaa laba sano, dhismaha cusubna wuxuu furmi doonaa bilawga sanad dugsiyeedka 2024-25 oo ah wakhti la mid ah markii kambaska la casriyeeyey ee Benson Polytechnic dib loo furay. Si aad u daawato nashqadda Dhismaha cusub ee Multiple Pathways to Graduation oo ay sameeyeen Bassetti Architects [fadlan guji halkan.](#)

Mahadsanidin Codbixiyayaasha

PPS iyo Xafiiska Casriyeynta Dugsigu waxay uga mahad celinayaan codbixiyayaasha codka ay siiyeen Curaaraha Dugsiga ee 2012, 2017 iyo 2020. Curaarahani waxay u oggolaadeen PPS inay sii waddo shaqada muhiimka ah ee sare u qaadidda caafimaadka, badbaadada iyo shaqaynta dhismayaasheena dugsiyada ee duugga ah. Macluumaad dheeraad oo ku saabsan mashaariicda curaarta PPS, fadlan booqo [webbeejka Curaarta PPS](#). Wixii su'aalo ah, fadlan kala xiriir Xafiiska Casriyeynta Dugsiga schoolmodernization@pps.net.